AUSCO

Barnaamijka Tilmaan-siinta Dhaqaneed ee Australia

# Dulmarka Australia

Akharinta Fudud

## Luqadda

**English**

Ingiriisigu waa luqadda qaranka Australia.



Barashada sida loogu hadlo ingiriisigu waxay aad muhiim u tahay markaad Australia ku noolaanayso.




Dadka qaarkiisa ee Australia ayaa sidoo kale ku hadla luqado kale.

**200+**

in ka badan 200 luqadood ayaa looga hadlaa:

- Guryaha
- Bulshooyinka – kooxo dad ah oo isku xiran



Taasna waxaa u sabab ah ugu yaraan boqolkiiba 25 dadweynaha Australia ayaa ku dhashay waddamo kale.



Waxaa kale oo jira in ka badan 20 luqadaha asaliga ah ayaa waxaa ku hadla dadka Aboorjiinka iyo Torres Strait Islander.

Kuwaasna waxaan ugu yeernaa luqadaha asaliga ah.

# Dadka asalagi ee Australia



Dadka Aboriginal iyo Torres Strait Islander waxay ku noolaayeen Australia ilaa 50,000 sano.

Waxaan kaloo ugu yeernaa dadka asaliga ah.




Waxayna ka mid yihiin dhaqamada ugu faca weyn adduunka.



Dadka Australia ee Aborjiinka iyo Torres Strait Islander waxay ku nool yihiin dowlad-goboleed iyo taritoriga kasta oo Australia ah.


Qaybaha kala duwan ee Australia, dadka Aboriginal iyo Torres Strait Islander waxay leeyihiin:




- Luqado



- citiqaadyo dhaqaneed



- citiqaadyo ruuxi ah

# Australia Dhaqamada-badan



Dad ayaa u soo guurayey Australia oo ka kala yimid adduunka oo dhan.

Dadkaas Waxaan ugu yeernaa soogalooti.




In ka badan 7.5 malyan dad ah ayaa u soo haajirey Australia ilaa iyo 1945.



In ka badan 800,000 oo soogalootigan ah waxay ahaayeen qaxooti.



Qaxootigu waa dad u baahday inay ka tagaan waddankooda sababtoo ah uma aysan ahayn mid ammaan u ah.


½

Ilaa kala-badh dadka Australia waxay:

- ku dhasheen waddanka dibadiisa
- leeyihiin waalid ku dhashay waddanka dibadiisa



Taasi waxay ka dhigaysaa Australia meel dhaqamo-badan leh.



Australia ma lahan diin rasmi ah ama mid dowladeed.





Waxaad xor u tahay inaad ku dhaqanto diintii aad doonto.




Diintaadu waxay u baahan tahay inay ogolaato waxa sharcigu qabo.




Waxaana ka mid ah sharciyada:

- dhammaan Australia oo dhan – sharciyada Commonwealth
- sharciyada dowlad-goboleedyada iyo taritoriyada



Dadka Australia waxay ku mideysan yihiin qiyamkooda.



Qiyamku waa waxyaalaha ay dadka Australia oo dhan rumaysan yihiin inay muhiim yihiin:

- sinnaanta – qof kasta waxaa loola dhaqmaa si siman wuxuuna leeyahay isla xuquuq



- diimoqaraadiyad – qof kastaa wuxuu ka qayb qaadanayaa sida waddanka loo maamulo



- xoriydda



- ixtiraamka dadka oo dhan

Australian Government
Department of Social Services

Oo ay bixisay Haya'dda Caalamiga ee Socdaalka ayadoo ka wakiila Wasaaradda Australia ee Adeegyada Bulshada

IOM • OIM